



*Ururada shaqaaluhu waxay ka wada shaqeeyaan hormarinta shuruudaha shaqada. Midani waa sababta xubin kasta - midaas macnaheedu waa adiga - waa muhiim oo aad ayaa loo soo dhaweynayaa!*

# Kusoo dhawow kooxda shaqa wadaagta ah!

Waxaan kugu casuumaynaa inaad kusoo biirto n Auto- ja Kuljetusalan Työntekijäliitto AKT ry.



**KA XUBIN URUR GANACSI AHAAN**, shaqaalaysiiyahaaga uma go'aamin karo shuruudahaaga shaqo sida ay rabaan. Xubinimadaadu waxay ku siinaysaa taageerada dhamaan xubnahayaga!

**Wakiilka shaqaalaha ee goobtaada shaqada** (luottamusmies) markasta waa inay noqotaa meesha ugu horeysa ee aad caawimo ka heli karto. Wakiilada shaqaalaha waxaa tababaray AKT waxaana lagu yaqaan shuruudaha shaqada. Waxay kaa caawin karaan inaad adkaato. Qofka kale ee muhiimka ah waa wakiilkaaga caafimaadka iyo badqabka shaqada. Ururkaaga ayaa sidoo kale kuu caawin kara si toos ah.

Waxaa kamid **dheefaha xubinimada**, mida ugu weyn uguna dhamaystiran waa **heshiiska wadareedka** lala galo shirkaada. AKT waxay matalaysaa shaqaalaha – adiga iyo shaqaalaha kale. Ururka shaqaaluhu waxay ka gorgortamaa heshiisyada wadajirka ah ururada dadka loo shaqeeyo. Iyadoo sharciga Finnishku uu wax yar oo kooban ka sheegayo shuruudaha shaqada, heshiisyada ay ka gorgortamaan ururkaaga shaqaaluhu waxay wax badan ka badan yihiin: **mushaharkaaga**, gunnada shaqada fiidkii iyo habeenkii, gunnada wakhtiyada fasaxa, mushaharka bukaanka oo fiican, wakhtiga fasaxa ah ee aad ku daryeesho ilmo jiran, mushaharka fasaxa qoyska, iyo tababarka.

Heshiis wadareedka wuxuu sidoo kale khuseeyaa xaaladaha iyo saacadaha shaqada, iyo sidoo kale **maalmaha fasaxa ah iyo fasaxyada** – heshiis weyn. Marka laga reebo maalmaha fasaxa ah iyo fasaxyada kale, heshiiska waxaa kamid ah wakhtiga shaqada oo la gaabiyo. Markii Finland ay u gudubtay maalmo shaqo oo gaaban, saacadaha shaqada ee shaqaalaha gaadiidka waxaa la dhimay maalmaha fasaxa ah oo dhan (*pekkaspäivä*). Waxaa jiro dheefo badan oo ay u leedahay shaqaalaha:

Dheefaha xubinimada waxaa kamid ah **la-talin iyo hagitaan**: AKT waxay kaa caawinaysaa inaad xaliso arimaha shaqada iyo mushaharka.

Dhibaatooyinka badan ee lagu qabo goobta shaqada ama mushaharka waxaa lagu xalin karaa wada xaajood, oo uu caawinayo wakiilka shaqaalaha. Khilaafyada waaweyn, xubnaha AKT waxay xaq u leeyihiin **caawimaad sharci ahaaneed**. Midani waxay ka dhigan tahay in ururku uu ka doodi doono kiiska xubinta maxkamadda sharciga oo uu qaadi doono kharashaadka sharciga ah.

**Guryaha wakhtiyada fasaxa** ee AKT waa faa'iido weyn ee xubinimo. Waxaa lagu kirayn karaa qiime jaban. Guryaheena wakhtiga fasaxa waa goobaha ay dadka Finnish ka jecel yihiin inay wakhti ku qaataan fasaxooda: Levi, Ylläs, Saariselkä, Ruka, Himos, Tahko.

Waxa kale oo aad heli doontaa jadwalka taariikhda AKT ee **diiwaanka** saacadahaaga ee la shaqeeyay. AKT waxay qabanqaabisaa tababarada xubnaheeda. Ururku waxaa kale uu bixiyaa dheefaha kale sida **caymiska xubinta ururka oo la awoodi karo qiimo ahaan** oo ay bixiso Turva iyo **dheefaha shidaalka** ee xarumaha Neste. Faa'iidada xubinimada kale waa rukumaada buuga la akhriyo ee BookBeat 45-maalmo. Adeegyada BookBeat waxay bixiyaan shaqooyin 17 luuqadood ah. Waxaan sidoo kale bixinaa tigidhada safarka oo qiimahooda la dhimay. AKT waxay qabanqaabisaa **munaasabado heer qaran ah iyo tartamo isboorti**.

Xubnaha waxay bixiyaan khidmada xubinimada. Khidmada xubinimada waa mid canshuurta laga bixiyo. Khidmada waxaa ku jira xubin ka noqoshada deeqda shaqo la'aanta, taas oo macnaheedu yahay guno wanaagsan haddii aad shaqo la'aan tahay.

Finland, shaqaale kastaa wuxuu **xaq iyo xoriyad** u leeyahay inuu ku biiro urur shaqaale. Gebi ahaanba waa sharci midaas oo ku haboon. Nagu soo biiritaankaaga, sidoo kale waxaad caawinaysaa qof kasta oo kale. Xubnaha ururada waxay kaaga mahad celinayaan kusoo biiritaanka kooxda shaqa wadaaga ah. **Si wadajir ah, waxaan saameyn ku yeelan karnaa mushaarkeena iyo arimaha bulshada ee muhiimka ah.**

**AKT WAXAA LAGU YAQAANAA URUR XOOG LEH**, oo ay xubno ka yihiin ilaa 40,000. Xubnahayagu waxay u shaqeeyaan darawalada looriyada, booyada, iyo baska. Waxaan sidoo kale leenahay xubno ka shaqeeya sida shaqaalaha rarka ka dejiya doomaha, tagsiileyaal, iyo shaqaalaha duulista, iyo taarminaalada, dayactirka dukaamada, hay'ada safarka, dekedaha, iyo dugsiyada lagu barto darawalnimada.

• La soo xiriir markasta oo aad u baahaantahay caawimaad  
• Laynka ururka shaqaalaha ayaa laga heli karaa +358 9 6131 1222.  
• Arimaha la xiriira xubinimada, wac +358 9 6131 1224. Waxaan ku hadalnaa ugu yaraan luuqada Finnish iyo Ingiriis. Waxaad isticmaali kartaa lifaaqa QR koodhka si aad iimayl noogu soo dirto.

